


Daawaynta COVID-19

Somali 12/2022

Maxay yihii?

Dawooyinka waxaa loo heleyaa si ay kaaga caawiyaan inaad la dagaalanto caabuqa COVID-19 oo waxaa kamid kiniinka fayraska. Daawaynahan waxa ay kaa caawin karaan inaanad qaadin xanuun daran iyo in lagu dhigo isbitaal, laakiin waa in la isku siyaa sida ugu dhakhsaha badan kadib marka ay bilaabmaan astaamuhu. In la is talaalo ayaa ah qaabka ugu wanaagsan ee aad kaga hortagi karto COVID-19.



Wax ma ii tarayaan?

Waxaad u qalmi kartaa daawaynahan hadii shaybaadh lagaaga helo COVID-19, aad ku jirto khatar badan oo xanuun aad u daran ah, oo ay astaamahaaguna bilaabmeen dhawaan. Caruurta jirta ilaa 28 maalmood ee khatarta badan ugu jira xanuunka aadka u daran ayaa u qalmi kara daawaynta. Kala hadal dhakhtarka si aad u eegto hadii daawayntani ay amaan u tahay oo ay wax u tarayso adiga iyo ilmahaaga.

Goorma ayay tahay in aan is daweeeyo?

Dawooyinkan waxay si wanaagsan wax u taraan hadii aad hore u qaadato isla marka aad xanuunsato. Waa inaad ku bilawdaa kiniinka fayraska 5 maalmood ee ugu horeysa marka ay astaamuhu bilaabmaan. Waxaa wanaagsan in la iska baadho COVID-19 isla markaba hadii aad yeelato astaamo si markaa aad u hesho oo aad u qaadato dawadan. Si aad goob shaybaadh uga hesho meel kuu dhaw booqo <https://coronavirus.utah.gov/testing-and-treatment>.



Sidee loo bixiyaa?

Kiniinka fayraska waxaa kuu qoraya dhakhtar oo waxa lagu qaataa guriga 2 jeer maalintii mudo 5 maalmood ah. Kaliya daryeel bixiye caafimaad oo loo ogol yahay, oo lagu tobobaray ayaa qori kara kiniinka fayraska.

Ma amaanbaa?

Dawoooyinkan waxaa ansixiyay Maamulka Dwoooyinka ee Federaalka (FDA), waxaana lagu muujiiyay tijaabooyinka caafimaad si ay badbaado iyo waxtar u yeeshan. Dhamaan dwoooyinka iyo daawaynta caafimaadku waxay leeyihiin saamayn caafimaad daro. Kala hadal dhakhtar ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ku siinaya dwoooyinkan hadii aad ka warwarayso saamaynta caafimaad darada iyo waxa ay tahay lala socdo.



Halkee ayaan ka heleyaa? Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka kowaad, xafisiyada dhakhtarka, xarumaha caafimaadka daryeelka degdega ah, isbitaalada, iyo farmasiiyada gobolka oo dhan ayaa haya haya dwoooyinkan. Kala hadal dhakhtarka si aad u aragto hadii dwoooyinkan ay kugu haboon yihii. Waxaa lagaa qaadi kara kharashka ama waxaa lagu dalici karaa caymiskaaga daawayntan.

Booqo coronavirus.utah.gov/treatments ama kala hadal Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bilaa Aadanka Utah 385-273-7878 si aad u hesho liiska goobaha ee aad ka heli karto dwoooyinkan.